Casharka 27

1. Muxuu Fircoonkii cusbaa ku sameeyey reer binu Israa'iil?
-Reer binu Israa'iil oo dhan wuxuu ka dhigay addoommo.

2. Maxaa Fircoon addoommo uga dhigay reer binu Israa'iil?
-Fircoon aad iyo aad buu u cabsaday in reer binu Israa'iil ay qabsadaan dhulka reer Masar ood han.

3. Maxaa Fircoon uga baqayey in reer binu Israa'iil ay qaataan dhulka?
-Waayo reer binu Israa'iil aad iyo aad ayey u tarmeen.

4. Yuu ahaa kii Fircoon hoggaaminayey si uu reer binu Israa'iil u addoonsado?
-Shayddaan.

5. Waa maxay sababta Shayddaanku u doonayey inuu burburiyo reer binu Israa'iil?
-Waayo Shayddaanku wuxuu garanayey in Ilaah ballanqaaday in Badbaadiyuhu ka soo bixi doono reer binu Israa'iil.

6. Maxaa Ilaah u barakadeeyey reer binu Israa'iil?
-Waayo Ilaah wuxuu aad iyo aad u jeclaa reer binu Israa'iil.
-Waayo Ilaah ma uusan doonaynin inuu ka baxo Axdigii uu Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub la dhigtay.

7. Maxaa Ilaah u soo diray gabadhii Fircoon si ay Muuse u korosi?
-Waayo Ilaahw uxuu qorshaynayey inuu reer binu Israa'iil ka saaro Masar iyo gurigii addoonsiga isagoo isticmaalaya Muuse.



8. Miyaa Israa'iil awood u lahayd inay iska xoreeyaan Fircoon?
-Maya.

9. Miyaa Muuse awooday inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo Fircoon?
-Maya.

10. Waa kuma kan kelidii awooday inuu reer binu Israa'iil ka xoreeyo Shayddaanka?
-Ilaah.

-Reer binu Israa'iil waxay addoonsigii Masar ku jireen afar-boqol oo sannadood.

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay aad iyo aad u silceen, ayey bilaabeen inay Ilaah hortii Ilaahaan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 2:23

23-Reer binu Israa'ilna addoonnimada aawadeed ayay ula taaheen, oo way ooyeen, oo oohintoodiina waxay gaadhay Ilaaha addoonnimada aawadeed.

-Miyaanu Ilaah maqlin oohintii reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 2:24-25

24-Ilaahna waa maqlay cabaadkoodii, makraasaa Ilaah xusuustay axdigiisii uu la dhigtay Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub. Markaasaa Ilaah arkay reer binu Israa'iil, Ilaahna wuu ogaaday xaalkoodii.
25-

-Ilaah wuu  maqlay oohintoodii.

-Ilaah wuxuu kaloo xusuustay ballankii uu la dhigtay Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

-Muxuu ahaa ballankii Ilaah la dhigtay Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub?

-Ballankii Ilaah wuxuu ahaa, afar boqol oo sannadood kaddib, in Ilaah reer binu Israa'iil ku celiyo dhulkii Kancaan.

-Laga yaabo in reer binu Israa'iil ay la noqotay in Ilaah illoobay iyaga, laakiin Ilaah iyaga ma illoobin.

-Ilaah wuxuu had iyo goor samaynayaa wixii uu ballanqaaday inuu sameeyo.

-Inkastoo Ilaah aanu degdegin, wuxuu mar waliba samaynayaa wixii uu balllan-qaaday wakhtigii uu ugu talagalay.

-Halkee buu Muuse joogay?

-Miyuusan Ilaah qudhiisu qorshaynin inuu reer binu Israa'iil ka wado addoonsigii reer Masar?

-Maaddaama Fircoon doonayey inuu Muuse dilo, Muuse wuxuu u baxsaday dhulkii reer Midyaan.

-Intii uu joogay dhulkii reer Midyaan, Muuse wuu guursaday, oo wuxuu lahaa laba wiil.



-Maalin, isagoo la jooga idihii sodoggiis, ayuu wuxuu arkay wax ka yaabiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:1-3

1-Muuse xuuu ilaalinayay adhigii soddoggiis Yetroo oo ahaa wadaadkii Midyaan, oo wuxuu adhigii u soo kexeeyey meeshii cidlada ahayd shishadeeda, markaasuu wuxuu yimid buurtii Ilaah oo ahayd Xoreeb.
2-Markaasaa malaa'igtii Rabbigu waxay uga muuqatay dab ololaya oo ka baxaya geed dhexdiis, kolkaasuuu fiiriyey oo wuxuu arkay oo dabku gubayo, geedkuna ma basayn.
3-Markaasaa Muuse wuxuu yidhi Anigu waan ku leexan doonaa, waanan arki doonaa muuqashadan weyn, iyo waxa geedku u guban waayay.

-Muxuu Muuse arkay?

-Muuse wuxuu arkay duur gubanaya, laakiin welibana duurku ma uusan baaba'aynin.

-Maxay ahayd sababta duurka gubanaya ee Muuse arkay aanu u basaynin?

-Waayo Ilaah baa ku dhex jiray.

-Waayo Ilaah wuxuu ku dhex jiray duurka, duurkuna ma uusan gubanaynin.

-Ilaah waa qaadir.

-Ma jiro cid samayn karta waxyaalaha Ilaah samayn karo.

-Waa maxay sababta Ilaah ugu dhex jiray duurka gubanaya?

-Ilaah wuxuu duurka gubanaya ugu dhex jiray waxay ahayd inuu Muuse kala hadlo wax ku saabsan Israa'iil.

-Sidee bay reer binu Israa'iil ku jeclaadeen duurka gubanaya?

-Isla sida dabku u burburiyo duurka, ayaa shayddaanka iyo Fircoon waxay doonayeen inay u burburiyaan Israa'iil.

-Isla sida Ilaah uu ugu dhex jiray duurka gubanaya, ayaa Ilaah ugu dhex jiray Israa'iil.

-Shayddaanka iyo Fircoon ma aysan awoodin inay burburiyaan Israa'il waayo Ilaah baa ku dhex jiro iyaga.

-Ilaah wuxuu Muuse uga dhex yeeray duurkii gubanayey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:4

4-Oo markuu Rabbigu arkay inuu ku soo leexday inuu arko ayaa Ilaah uga yeedhay geedka dhexdiisii, oo wuxuu ku yidhi, Muusow, Muusow, markaasuu yidhi, Wa i kan.

-Muuse ma uusan garanaynin in Ilaah ku dhex jiro duurka gubanayey Ilaah Ilaah kala dhex hadlo isaga isla duurkaas gubanayey.

-Sidee baa Ilaah ku gartay luuqaddii Muuse ku hadlayey?

-Ilaah wuxuu garanayaa luuqadaha oo dhan.



-Ma jirto luuqad aanu Ilaah garanaynin.

-Ilaah wuu garanayaa luuqaddaada xitaa.

-Ilaah wuxuu maqlaa wax waliba ee aad tiraahdo.
-Ilaah wuxuu fahmayaa wax waliba ee aad oranayso.

-Weliba haddiiaad hadalkaaga hoos u dhigto, weli Ilaah wax waliba ee aad tiraahdo wuu maqlayaa.

-Ilaah mar kale ayuu Muuse kala hadlay duurkii gubanayey.

Bal aynu akhrinoo Baxniintii 3:5-6

5-Oo markuu RAbbigu arkay inuu ku leexday inuu arko ayaa Ilaah uga yeedhay geedka dhexdiisa, oo wuxuu ku yidhi, Muusow, Muusow, markaasuu yidhi, Waa i kan.
6-Oo weliba wuxuu kaloo ku yidhi, Anigu wxaan ahay Ilaahii aabbahaa oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq, iyo Ilaahii Yacquub. Markaasaa Muuse wejigiisii qariyey, waayo, wuxuu ka cabsaday inuu ilaah eego.

-Waa maxay sababta Ilaah Muuse ugu yiri iska siib kabaha?

-Waayo Muuse wuxuu hortaagnaa Ilaaha Kaamilka ah.
-Waayo Muuse wuxuu hor taagnaa Ilaah Qoduus ah.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay wax ku saabsan Israa'iil

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:7-10

7-Rabbiguna wuxuu ku yidhi, Hubaal waxaan arkay

dhibaatada dadkayga ku haysata Masar, oo waan maqlay oohintii ay ooyeen kuwa hawsha ku qaxraya aawadood, waayo, anigu waan ogahay caloolxumadooda;

8-Oo waxaan u imid inaan ka samato bixiyo gacanta Masriyiinta, iyo inaan ka soo bixiyo dhulkaas, oo keeno dhul wanaagsan oo ballaadhan, oo ah dal caano iyo malab la barwaaqaysan; waana meesha aydeggan yihiin reer Kancaan, iyo reer Xeet, yo reer Amoor, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus.

9-Oo haatan bal eeg, waxaa i hor timid oohintii reer binu Israa'iil, oo weliba waxaan arkay cadaadinta ay Masriyiintu ku cadaadinayaan iyaga.

10-Haddaba kaalay, oow axaan kuu dirayaa Fircoon, inaad dalka Masar ka soo kaxaysid dadkayga reer binu Israa'iil ah.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu mqlay taahii reer binu Israa'iil.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu isaga u doortay inuu reer binu Israa'iil ka bixiyo Masar iyo gurigii addoonsiga.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu u doortay in reer binu Israa'iil uu ku celiyo dhulkii reer Kancaan.

-Muxuu Muuse Ilaah ugu jawaabay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:11

11-Markaasaa Muuse wuxuu Ilaah ku yidhi, Bal yaan ahay anigu, markaan Fircoon u tegayo, oo aan reer binu Israa'iil ka soo bixinayo dalka Masar?



-Muuse wuxuu Ilaah u sheegay inaanu isaga Muuse ah awood u lahayn inuu reer binu Israa'iil ka soo bixiyo dhulkii Masar.

-Waa maxay sababta Muuse Ilaah ugu leeyahay, anigu ma awoodo inaan reer binu Israa'iil ka bixiyo dalka Masar?

-Waayo Muuse wuxuu xusuustay wakhtigii uu isku dayey inuu caawiyo nin ka mid ahaa reer binu Israa'iil iyo sidii uu ugu guul-darraystay.

-Maxaa Ilaah ugu jawaabay Muuse?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:12

12-Markaasuu wuxuu ku yidhi, Xaqiiqa anigaa kula jiraya, oo taasaa calaamo kuu noqonaysa, inaan anigu ku sood iray; markii aad dadka ka soo bixiso Masar, Ilaah baad buurtan ugu adeegi doontaan.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu la jiri doono.
-Ilaah wuxuu kaloo calaamad siiyey Muuse.

-Maxay ahayd calaamaddii Ilaah siiyey Muuse?

-Ilaah wuxuu ka ballan-qaaday Muuse inuu Muuse ku soo celin doono halka uu taagan yahay ee duurkan gubanaya, laakiin aan basayn.

-Buutra magaciidu wuxuu ahaa Buur Siinaay.

-Maxaa Ilaah Muuse ugu jawaabay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:13

13-Markaasaa Muuse wuxuu Ilaah ku iydhi, Bal eeg, markii aan u tago reer binu Israa'iil, oo aan ku idhaahdo iyaga, Ilaahii awowayaashiin baa ii soo kiin diray, oo iyana waxayigu odhan doonaan, De magiciisa maxaa la yiraahdaa? Haddaba maxaan ku odhan doonaa?

-Muuse wuxuu ka baqay in reer binu Israa'iil aanay isaga rumaynin marka uu iyaga ku leeyahay Ilaah baa ii soo kiin diray si laydiinka samatabbixiyo addoonsiga.

-Markaa, Muuse wuxuu Ilaah su'aalayaa magaciisa, kaasoo dadka reer binu Israa'iil uu u sheegi doono.

-Sidee baa Ilaah ku jawaabay?

Bal aynu akhrinno Abanxiintii 3:14

14-Markaasaa Ilaah wuxuu Muuse ku yidhi, ANIGU WAXAAN AHAY KAAN AHAY; Oo weliba wuxuu ku yidhi, Waxaad ku odhan doontaa reer binu Israa'iil, WAAN AHAY Baa ii soo kiin idray.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu reer binu Israa'iil u sheego in "WAAN AHAY" uu soo diray si iyaga reer binu Israa'iil ah looga samatabbixiyo addoonsiga.

-Maxaa magaca Ilaah ee "WAAN AHAY KA MACNE YAHAY?"

-Waxaa magacaasu ka macne yahay in Ilaah aanu bilow lahayn.



-Wuxuu kaloo ka macne yahay inaanu dhammaad lahayn."

-Waxaa kaloo magacaasi ka dhigayn yahay in Ilaah mar walia nool yahay.
-Wuxuu ka macne yahay inaanu jirin wakhti aanu Ilaah noolayn.

-Ilaah sidan buu ku leeyahay Muuse:

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:15-18a

15-Oo Ilaah weliba wuxuu kaloo Muuse ku yidhi, Waxaad ku tidhaahdaa reer binu Israa'iil, Rabbiga ah Ilaahii awowayaashiin, oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq, yo Ilaahii Yacquub ayaa ii soo kiin diray; kanu waa magacayga weligay, oo laygu xusuusto ka ab ka ab.
16-Bal tag oo isu soo ururi waayeellada reer binu Israa'iil, oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga ah Ilaahii awowayaashiin, oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq, iyo Ilaahii Ycquub ayaa ii muuqday, isagoo leh, Hubaal waan idin soo booqday, oo waan arkay waxa laydinku sameeyey Masar dhexdeeda.
17-Oo waxaan idhi, Anigu waan idinka soo wadi doonaa dhibaatada Masar, oo waxaan idin keeni doonaa dalka reer Kancaan, iyo reer Xeet, iyo reer Amoor iyo reer Feries, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus, oo ah dal caano iyyo malab la barwaaqaysan.
18-Oo codkaaga way maqli doonaan.

-Ilaah wuxuu u sheegay Muuse in reer binu Israa'iil uu u sheego in Ilaahii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub uu isaga Muuse ah soo diray si reer binu Israa'iil looga bixiyo addoonsiga.

-Miyaa Fircoon u oggolaanayaa reer binu Isra'aiil inay ka tagaand

hulkii Masar?

-Haddaba Ilaah sidan ayuu leeyahay.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 3:19-20

19-Oo anna waxaan ogahay inaanu boqorka Masar idiin sii daynayn inaad tagtaan, maya, ee wuxuuna idiinku diidayaa gacan xoog leh.
20-Markaasaan gacantayda soo kala bixin doonaa, oo waxaan Masar ku samayn doonaa cajaa'ibyadayda oo dhan oo aan ku dhex samayn doono iyada, oo mrkaas dabadeed wuu idin sii dayn doonaa inaad iska tagtaan.

-Miyaa Ilaah garanayaa in Fircoon aanu u oggolaanaynin reer binu Israa'iil inay ka baxaan dhulkii Masar?
-Haa.

-Sidee baa Ilaah ku garanayaa in Fircoon aanu u oggolaan doonin in reer binu Isra'aiil ay dhulka ka baxaan.

-Ilaah wax waliba wuu garanayaa.

-Intaadan wax samaynin ka hor, Ilaah wuu garanayaa waxa aad samayn doonto.

-Muuse wuxuu ka baqayaa in reer binu Israa'iil aanay rumaysan in Ilaah u doortay isaga inuu iyaga ka bixiyo dhulkii Masar.

-Muuse sidan buu Ilaah ku leeyahay.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:1



1-Markaasaa Muuse jawaabay oo wuxuu yidhi, Laakiinse, bal ogow, inta ay rumaysan doonaan, codkaygana ma ay dhegaysan doonaan, waayo, waxay igu odhan doonaan, Rabbigu kuuma uu muuqanin.

-Maaddaama Muuse uu baqayey, Ilaah wuxuu Muuse siiyey laba calaamadood ee ay ahayd inuu tuso reer binu Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:2-9

2-Markaasaa Rabiigu wuxuu ku yidhi, Waa maxay waxaas gacantaada ku jira? Oo wuxuu yidhi, Waa ul.
3-Markaasuu ku yidhi, Bal dhulka ku tuur. Markaasuu dhulka ku tuuray, oo waxay notoay abeeso. Kolkaasaa Muuse ku hor cararay.
4-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal gacanta soo fidi oo dabada ku dheg, kolkaasuu gacantii soo fidiyey oo dabada ku dhegay, kolkaasay noqotay ul gacantiisa ku jirta.
5-Sidaas yeel inay ku rumaystaan inuu kuu muuqday Rabbiga ah Ilaahii awowayaashood, oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq, iyo Ilaahii Yacquub.
6-Oo Rabbigu wuxuu kaloo ku sii yidhi, isagii, Bal gacanta laabta saar, markaasuu gacanta laabta saaray, oo mrkii uu ka qaaday, bal eeg, gacantii baras bay yeelatay oo waxay u caddaatay sida baraf cad.
7-Markaasuu ku yidhi, Bal gacanta laabta mar kale saar. Kolkaasuu mar kale gacantii laabta saaray, oo markii uu ka qaaday laabtii, bal eeg, wxay haddana u rogmatay oo u ekaatay sida jidhkiisii kale.
8-Oo waxay noqon doontaa, hadday kugu rumaysan waayaan oo ay calaamada hore codkeeda maqli waayaan, de

markaas calaamada dambe codkeeday rumaysan doonaan.

9-Oo haddana waxay noqon doontaa, hadday rumaysan waayaan labadan calaamo, oo wleiba ay codkaaga maqli waayaan, de markaas bal waa inaad webiga biyo ka qaaddid oo aad dhulka engegan ku shubtid, oo biyihii aad webiga ka qaadday, markay gaadhaan dhulka engegan dhiig bay noqon doonaan.

-Maxay ahayd calaamaddii kowaad ee muujinaysa in Ilaah Muuse u doortay inuu reer binu Israa'iil ka wado dhulkii Masar?

-Waxay ahayd ushii Muuse oo marna abeeso noqonaysa marna ul caadi ah.

-Maxay ahayd calaamadda labaad ee muujinaysa in ilaah doortay Muuse si uu reer binu Israa'iil uga saaro dhulka Masar?

-Muuse gacantiisa ayaa sida wax barras ku dhacay oo kale caddaanaysa markii uu llabtiisa saaro gacantiisa, oo markii uu ka qaado laabtiisana, gacantu caadi ayey ku soo noqonaysay.

-Weliba markii labadaas calaamadood ee ilaah ka yimid la siiyey, ayaa Muuse weli ka baqayey in reer binu Israa'iil aanay isaga raacin ama ay ka hor yimaadaan.

-Muusena sidan buu ku leeyahay Ilaah.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:10

10-Markaasaa Muuse wuxuu Rabbiga ku yidhi, Rabbiyow, anigu codkar ma ahi, hadda iyo hore toona, iyo tan iyo markaad ila hadashay anigoo addoonkaaga ah, maxaa yeelay, anigu hadalka waan shigaa, waanan carrab la'ahay.



-Muuse  wuxuu Ilaah ku leeyahay anigu si wanaagsan uma hadli karo oo waan shigshigaa.

-Maxaa Ilaah ku jawaabay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:11-12

11-Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Kan dadka afkiisa sameyey waa ayo? Yaase dadka carrab tira, ama dhego tira, ama wax tusa, ama indho tira? Sow anigan Rabbiga ah ma aha?

12-Haddaba sidaas daraaddeed tag, oo anigaa afkaaga la jiri doona oo ku bari doona wixii aad ku hadli lahayd.

-Waa kuma kan Muuse siiyey awoodda lagu hadlo?
-Ilaah.

-Waa kuma Kan awoodda u leh inuu Muuse si hagaagsan u hadlo?
-Ilaah.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegayaa inuu ku caawiyo sidii uu codkar ku noqon lahaa, oo aanu kol dambe u shigshigin.

-Inkastoo Ilaah doonayey inuu Muuse caawiyo, Muuse haddana dooni maayo inuu reer binu Israa'iil ka soo bixiyo dhulkii Masar.

-Bal aynu akhrinno waxa Muuse ku leeyahay Ilaah.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:13

13-Isna wuxuu yidhi, Rabbiyow, Waan ku baryayaaye, dir kaad doonaysid inaad dirtid.

-Ilaah Muuse ayuu ku carooday, waayo muuse wuxuu ka baqayey inuu reer binu Israa'iil hoggaamiyo oo uu ka bixiyo dhulkii Masar.

-Ha yeeshee Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu soo diro qof kale oo Muuse ku caawiya sidii uu Fircoon ula hadli lahaa.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:14-17

4-Markaasaa Rabbigu u cadhooday Muuse, oo wuxuu ku yidhi, Sow ma joogo walaalkaa Haaruun oo ah reer Laawi? Waan ogahay inuu isagu si wanaagsan u haldi karo. Oo bal ogow, wuu u soo socdaa inuu kula kulmo, oo markuu ku arko, qalbigiisuu ka farxi doonaa.

15-Haddaba waa inaad isaga la hadashaa, oo aad erayada afkiisa ku riddaa, oo anigu afkaagaan la jiri doonaa, iyo afkiisaba, oo waxaan idin barayaa wixii aad samayn lahaydeen.

16-Oo isagu wuxuu kuu noqon doonaa ninka dadka kuula hadla, oo waxay noqon doontaa inuu isagu af kuu noqdo, adna waxaad isaga u noqon doontaa Ilaah oo kale.

17-Haddaba waa inaad gacanta ku qaadatid ushan aad cajaa'ibyada ku samayn doontid.

-Yuu Ilaah u soo diray Muuse si loogu caawiyo in uu Fricoon la hadlo?

-Haaruu, oo ahaa Muuse walaalkii.

-Waayo Ilaah wuxuu Muuse ka ballan qaaday, in Haaruun oo ahaa walaalkii, uu caawiyi doono Muuse, oo Muusena wuu oggolaaday.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:18-20



18-Markaasaa Muuse tegey oo wuxuu ku noqday soddoggiis Yetroo, oo wuxuu ku yihdi, Waan ku baryayaaye, Bal i sii daa aan tagee, oo ku noqdo walaalahayga Masar jooga, oo aan soo arkee bal inay nool yihiin iyo in kale. Markaasaa Yetroow uxuu Muuse ku yidhi, Nabad ku tag.

19-Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi Muuse, isgoo Midyaan jooga, Tag, oo Masar ku noqon, waayo, dadkii doondoonayay inay nafta kaa qaadaan way wada dhinteen.

20-Markaasaa Muuse wuxuu watay naagtiisii iyo wiilashiisii, oo wuxuu saartay dameer, wuxuuna ku noqday dalkii Masar. Markaasaa Muuse ushii Ilaah gacanta ku qaatay.

-Ilaah aad buu ugu samray Muuse.

-Weliba inkastoo Muuse aanu doonaynin inuu reer binu Israa'iil ka wado dhulka Masar, Ilaah baa isaga doortay.

-Maxaa Ilaah u doonayaa inuu reer binuIsraa'iil ka badbaadiyo addoonsiga?

-Waayo Ilaah wuu jecel yahay iyaga, oo ma uusan doonaynin inay ku noolaaaan gunnimo.

-Waayo Ilaah wuxuu Ibraahim ka ballan-qaaday inuu dadkiisa ku celin doono dhulkii Kancaan.

-Waayo Ilaah wuxuu Ibraahim inuu Badbaadiyaha ka soo dhex bixi doono Israa'iil.

-Cashrka xiga, wxaannu ku arki doonnaa sida Ilaah u badbaadinayo Israa'iil.